



Wax ka ogow HelsaMi

Iskaangaree sirta QR-koden ama war dheeraad ah ka akhriso bogga [helsami.no](http://helsami.no)

**Warbixin gaaban oo lagaa siinayo waxa HelsaMi ay tahay:**

**Waa maxay HelsaMi?**

- Haddii aad gashid app (aabka) ama shabakadaha warka keena waxaad fikir guud ka helikartaa macluumaadka caafimaadkaaga iyo inaad la hadashid shaqaalaha caafimaadka – waa wax fudud oo sugan.

**Maxaan HelsaMi u adeegsan karaa?**

- Inaad ballamahaaga ogaato
- Inaad fiirsatid macluumaadka caafimaad iyo jawaabaha tijaabooyinka lagaa qaaday
- Waraaqaha iyo farriimaha lagu soo diro
- Caafimaad baarid la adeegsado fiidiyow
- Iyo waxyaalo kaloo badan

**Ma ku qasbanahay in aan HelsaMi isticmaalo?**

- Maya, boqolkiiba boqol waa ikhtiyaari. Taleefanka iyo waraaqaha boosta ayaad sidii hore u isticmaali kartaa.

**Macluumaadkaygu si amni leh ma ugu jiraa HelsaMi?**

- Haa, waxaad ku gelyasaa ID-porten, si la mida sida aad ugu geshid adeegyada kalee dawladda.

**Yaa isticmaali kara HelsaMi?**

- Adiga ka weyn 16 sano ee gargaar caafimaad ama adeegyo daryeelitaan uga baahan isbitaallada, degmooyinka iyo dhakhaatiirta joogtada ah ee iyaguna isticmaala HelsaMi. War guud waxaad ka helayasaa [www.helsami.no](http://www.helsami.no)
- Waxaad kaloo u gelikartaa qofka buka ee aad ehelka u tahay ama carruurtaada.

**Maxaan ka heli karaa HelsaMi oo aanan ka heli karin Helsenorge?**

- HelsaMi waxaad ka fiirsan kartaa macluumaadka ku qoran faylkaaga caafimaad, tusaale ahaan waxyaalaha si kooban looga qoro kulamada baaritaanka caafimaad, isbitaal dhigista iyo waxyaale kaloo badan.
- Waxaa kuu suuro gelyasa inaad wadahalal la yeelatid dhawr shaqaalaha caafimaadkaaga ah.

Hay'adda Helseplattformen waxaa leh degmooyinka bartamaha Norway iyo Hay'adda Helse Midt-Norge. Dhawr luuqadood ayaa lagu turjumay: [www.helsami.no](http://www.helsami.no)



[www.helsami.no](http://www.helsami.no)

